

# ***Imtixaamka Xisaabta ee Barashada Ingiriisiga ay ku Cusubtahay (MTELL)***

***Su'aalaha iyo Jawaabaha ku saabsan MTELL***



## **Waa maxay MTELL?**

MTELL waa qiimayno is xiga ee internet ah oo loo diyaariyay kuwa Barashada Ingiriisiga ay ku Cusubtahay (ELL) darajooyinka 3-8 iyo 11 oo u baahan imtixaamka xisaabta ayna ku cusubtahay luqadda Ingiriisiga. Imtixaamada waxa ay ku qoranyihiin Ingiriis fudud si loo dhimo tirada iyo erayada adag ee xisaabta lagu furfurayo ee metelaya xaaladaha dhabta ee nolosha. Qofka ku jira ELL oo qaadanaya MTELL waa in uu muujiyo in uu la socon karo imtixaamka heerarka darajada u dhigma. MTELL waxa ay u imtixaamtaa heer xiisaab ee lamid ah MCA-II. Daraja kasta waxa ay leedahay imtixaam u gaar ah.

MTELL waa imtixaam lamid ah heerka Xisaabta Qiimaynta Midayysan ee Minnesota – Taxanayaasha II (MCA-II). Marka la eego Sharciga Cunugna Dib Looma Reebayo, waxqabadka arday kasta ee qaadanaya MTELL ama Xisaabta MCA-II ayaa loo isticmaali jiray in lagu ogaado in uu Gaaray Horumarka Sanadeed ee Laga Rabay (AYP).

## **Yaa laga rabaa in uu imtixaamka qaato?**

Ardada la ogyahay “fahamkooda luqadda Ingiriisiga uu ku cusubyahay” (LEP) ayaa qaadan kara imtixaamkan. MTELL waxa uu galaya **booska** laga qaadan lahaa Xisaabta MCA-II; ELL ma qaadanayaan labada imtixaamba.

## **Maxaa la iska rabaa si lagu baaso imtixaamka?**

Ardada imtixaamka kuma baasayaan mana ku dhacayaan. Arday kasta waxa uu helayaa buundo hoosimaanaysa mid

kamid ah afarta heer - Ma Qancinayso Heerka Rasmiga, Qayb Ahaan Qancinayso Heerka Rasmiga, Qancinayso Heerka Rasmiga, ama Xad-dhaafay Heerka Rasmiga.

## **Waa maxay qaabka uu yahay MTELL?**

Imtixaamka kombiyuutarka ayaa lagu qaata. Xisaabo nolosha dhabta saameyaa ee mowduuc ku salaysan ayaa la soo bandhigayaa si markaasi aysan ardada kala kulmin xaalado ka yar kuwa MCA-II ee Xisaabta. Aradada waxa ay dhegaysan karaan shay kasta ayaadoo ay indhohooda ku arki karaan shaashadda, haddii ay u baahdanna su'aal kasta waa ay ku laaban karaan.

## **Maxaa yihiin xirfadaha ku jira MTELL?**

Waxaa jira laba nooc iyo saddex qaybood ee su'aalaha MTELL:

**Noocyada** waa dhowr jawaab gaaban leh u habaysan oo kala doorasho leh. Waxyaabaha jawaabaha gaaban ee habaysan, noocyada jawaabaha tirooyinka leh ee ardada ee calaamadaysan.

**Qaybaha** waa jawaabo calaamado leh , eraybixin xisaab iyo Ingiriis kooban (sheltered English).

- *Shayayada leh calaamadaha jawaabta waxa ay yihiin* masalooyin xisaab ah oo aan luqadi ku jirin ee leh tusmooyin fudud.
- *Eraybixin Xisaab ah* shayada oo leh erayo-bixin xisaabeed ardadana waxa laga filanayaa inay yaqaanaann heerka darajada la siiyay.
- *Sheltered English* shayayada waxa laysugu soo aruuriyay sheekooyin is-

shabbaha ee masalooyin af Ingiriis fudud lagu qoray.

hosaysa Accountability Programs: Assessment iyo Testing: Assessments)

### **Maxay yihiin xeerarka aaladda xisaabta lagu isticmaali karo?**

Darajooyinka qaakooda, ardada qaadanaysa MTELL aaladda xisaabta ma ay isticmaali karaan qaybta ay ku jirto xirfadaha cabbiridda. Aaladda xisaabta waxaa lagu isticmaali karaa qaybaha kale ee intixaamka taaso lagu cabbirayo awoodda ah in uu qof caqliga kaashado kaddibna uu go'aan ka gaaro waxa ay yihiin masalada xirfadaha xisaabta furfuraya.

Marka aaladda xisaabta loogu oggolaado intixaamka, ardada waxa ay isticmaali karaan aaladda xisaabta affar fansaar leh ama midka sayniska ah. Aaladda xisaabta waxaa lahaan kara ardayga ama dugsigu, midkood. Ardada waxa ay kaloo isticmaali karaan aaladda xisaabta shaashadda ku yaalla. Ardada looma oggola in ay aaladda xisaabta la wadaagaan ardada kale ama ay eegaan tusmooyinka lagu isticmaalo aaladdaxisaabta.

### **Sideen ku heli karaa natiijooyinka MTELL ee cunuggayga?**

Natiijooyinka oo dhan waxaa loo dirayaa dugsigu degmada. Degmada ayaa kuu soo dirayso natiijada cunuggaaga.

### **Siday ardada isugu diyaariyaan intixaamadan?**

Waxa aad fiirisaa warqadaha tasmada, "Test Preparation Suggestions for Students, Teachers and Parents" ee ka hosaysa [Assessments section](#)<sup>1</sup> ee shabakadda Internetkeena si aad uga heshi nasexoyin ku saabsan isudiyarinta guud ee qaadashada intixaamka iyo sida loo isticmaalo xisaabiyaha.  
(<http://education.state.mn.us> – ee ka

### **Xaggee kale ayaan ka heli karaa akhbaar dheeraada ee ku saabsan MTELL?**

Waxa aad aada shabakaada Internetka ee Waaxda Waxbarashada kaddibna u gudub: Accountability Programs: Assessment and Testing: Assessments: ELL Tests

---

***Faahfaahin dheeraad ah la xiriir:***

Minnesota Department of Education  
Research and Assessment  
mde.testing@state.mn.us  
1500 Highway 36 West  
Roseville, MN 55113-4266  
(651) 582-8200